

Hanaanada Si Taxaddar leh u Diyaarinta Goobaha Cuntada Tafaariiqda ah

HACCP IYO NOOCYADA

Hanaanada Si Taxaddar leh u Diyaarinta Cunnada

Hanaanada si taxaddar u diyaarinta waa hanaanno iyo habraacyo qasab ka dhigaaya xakamaynada gaarka ah ee badqabka cuntada oo aan lagu sheegin xeerka cuntada ee Minnesota. Farsamooyinka ayaa badanaa u baahan qalab gaar ah, maadooyin gaar ah iyo tignooloojiyad. Sabab la xariirta khatarta soo kordhaysa ee caafimaadka, hanaanada gaarka ah ee goobaha cuntada tafaariiqda ah waa in lagu sameeyaa habraacyada adag ee shaqada.

Hanaannada si taxaddar leh u diyaarinta ah waxaa kamid ah:

- Baakadaynta oksijiintu ku yar tahay (ROP) ayna ku jiraan:
 - Xakamaynta waqtiga/heerkulka hawada baakadaynta ee badqabka cuntada (TCS) (tusaale, hilibka daawaysan, hilibka ceeriinka ah, digaaga ceeriinka ah, khudaarta ceeriinka ah, burcadka qaar kamid ah oo kooban)
 - Hanaanka cunto karinta iyo qaboojinta
 - Habraaca Hawo la'aan ku karinta (Sous vide process)
 - Heerka baakadaynta wax laga badalay (MAP)
 - Baakadaynta cimilada maaraysan (CAP)

- Daawaynta cuntada (tusaale, hilibka khaansiirka, cayshka, maraqa xagaaga, salami, hilib lo'aad dhuuban/isteegyada, charcuterie).
- Uuminta cuntada si loo kaydsho, halkii lagu dari lahaa macaaneeyaasha (tusaale, kaluunka, hilibka xoolaha iyo digaaga).
- Gawraca cuntada xoolaha ugaarta.
- Adeegsiga waxyaabaha cuntada lagu daro si loogu daro qaybo, sida khal (vinegar) si loo kaydho ama loogu dheereeyo mudada jiritaanka ee cuntada aan ahayn TCS (tusaale, bariiska sushi, sauerkraut, kimchi, yooqadka, maraqa).
- Maamulida taangiga kalluun qolfeedka molluscan si loogu kaydho looguna soo bandhigo kalluun qolfeedka dadku cunaan.
- Miraha misirta iyo digirta.
- U diyaarinta cunto qaab kale oo kasta oon lagu qeexin xeerka cuntada (tusaale, adeegsiga waqtiyada iyo heerkulka cuntada oo kaladuwan oo loo adeegsado hilibka xoolaha ee ceeriinka ah, ama qalajinta kaluunka, hilibka iyo digaaga).

Hanaannada si taxaddar leh u diyaarinta ah ee lagu adeegsado goobaha tafariiqda cuntada ayaa u baahan qorshaha HACCP ee horay loo ogolaaday. Badanaa, nooca cuntada ayaa sidoo kale qasab ah.

Cabitaanka Miraha

Samaynta cabitaanka miraha looma aqoonsanaayo hanaan qaas ah gudaha xeerka cuntada ee Minnesota,

laakiin waxaa qasab ah in qorshaha HACCP lagu daro markay xaaladahaan jiraan:

- Samaynta cabitaanka miraha oon baakadaysnayn laguma sameeyo dhismayaasha meel ay joogaan bulsho aad u nugul.
- Ku baakadaynta cabitaanka goobta cuntada, ilaa in la buuxsho maahee shuruudaha cabirka ee Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.0367 B.

Qorshaha HACCP

Qiimaynta khatarta iyo bar koontaroolka muhiimka ah ayaa ah qaab kahortag oo lagu ilaaliyo badbaadada cuntada. Waxay sheegaysaa khataraha badqabka cuntada ee hanaanka cunto samaynta iyo talaabooyinka qasabka ah in la qaado si loo yareeyo khatarahaas lagana dhigo heer badqab leh.

"Qorshaha HACCP" waxaa looga jeedaa dukumiinti qoraal ah oo sharxaaya habraacyada rasmiga ah ee ku dhaqanka Mabaadii'da Qiimaynta khatarta iyo Bar koontaroolka muhiimka ah ee Gudigga Qaran ee Talo bixinta Shuruudaha il ma aragtayda nool ee Cuntada (The National Advisory Committee on Microbiological Criteria for Foods).

Todobada mabda'a ee qorshaha HACCP

1. Samee qiimaynta khatarta.
2. Go'aanso bar koontaroolka muhiimka ah (CCPs).
3. Samee xadiyada muhiimka ah.
4. Abuur habraacyada kormeerka ee bar koontaroolka muhiimka ah.
5. Abuur talaabooyinka toosinta ah.
6. Abuur habraacyada diiwaan haynta iyo qorista dhacdooyinka.
7. Abuur habraacyada xaqiijinta in qorshaha HACCP shaqaynaayo.

Adoo adeegsanaaya todobadaan mabda', qorshaha HACCP ayaa aqoonsada waxna ka qabta bar koontaroolka muhiimka ah (CCPs) ee ay suuragalka

tahay in cudur ama dhaawac ka yimaado marka aan la xakamayn khatarta.

Qaybta 5 ee [Xeerka Cuntada ee FDA 2013 \(FDA Food Code 2013\) \(PDF\)](#) waxaa ku qoran tilmaamaha HACCP. Farqada 6 waxaa ku jira shuruudaha cunto samaynta.

Noocyada

Shuruudaha lagasoo reebaayo qaybo gaar ah oo xeerka cuntada ee Minnesota ah ayaa lagu baxshaa si goob iyo xaaladeeda ah. Haddii aad qorshaynayso samaynta hanaanno gaar ah ood ku samayso goobtaada cuntada tafaariiqda ah, gudbi codsiga nooca cuntada ood u dirayso maamulkaaga sharciyaynta. Codsigaaga waa inaad ku xoojisaa qorshaha HACCP oo la ogolaaday iyo dukumiintiyo muujinaaya in shaqada si badqab leh loo fulin karo. Sug ilaa codsiga nooca cuntada aad bixiso la aqbalaayo kahor intaadan bilaabin shaqada gaarka ah.

Nooc qasab kuma ahan ROP haddii loo sameeyo si waafaqsan cabirada gaarka ah ee lagu sheegay Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.0420.

Macluumaadka

[FDA Food Code 2013 \(PDF\)](#)
(<https://www.fda.gov/media/87140/download>)

Hennepin County Environmental Health

479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344

612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth

Specialized processes in retail food_Somali_HC_6-25

Content courtesy of the [Minnesota Department of Health](#)

